



Xaashida Ilaaha Xogta ee macluumaadka Cashuuraha Janaayo 2022

Sida loo xareeyo cashuur celintaada

Ma u baahan tahay caawimaad ku saabsan sidii aad xarayn lahayd cashuurahaaga? Wakaaladda Cashuuraha Kanada (CRA) waxay martigelisaa xarumo ama goobo bilaash ah oo loogu talagalay dadka u qalma iyada oo loo marayo Barnaamijka Taageerada Dakhliga Bulshada.

Waxaad ka heli kartaa liistada xarumahan oo ku yaal agagaarkaaga bogga CRA ee Canada.ca/revenue-agency. Magaalada Toronto sidoo kale waxay dhiirrigelisaa xarumo cashuureed bilaash ah; waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeri ah halkan toronto.ca ama adigoo wacaya 311 .

Waxaad sidoo kale ku xareyn kartaa cashuurahaaga khadka tooska ah adoo adeegsanaya mid ka mid ah softiweerka Netfile ee soo socda ee ay ansixisay CRA sida:

- CloudTax
- H&R Block (khadka tooska ah)
- SimpleTax
- TurboTax
- UFile Cashuur celisyada iyo dheefaha

Cashuur celimaha iyo dheefaha

Markaad cashuurahaaga xarayso sanad walba, waxaad xaq u yeelan kartaa cashuur celin ama cashuur dhaaf iyo faa'iidooyin kala duwan.

Cashuuraha Shaqsiyaadka iyo qoysaska Dakhliga-hooseeya (LIFT)

Waxay siisaa illaa \$850 cashuur-dhimista shaqsiyaad dakhliga hooseeya iyo shaqaalaha mushaharka ugu yar ku shaqeeya iyo illaa \$1,700 dadka lamaanayaasha ah.

Gargaarka Carruurta Ontario

Waxay siisaa ugu badnaan lacag \$1,434 cunuggii sanadkiiba qoysaska dakhligoodu hooseeyo ama dhexdhexaadka yahay, ha shaqeeyaan ama yaanay shaqeynin.

Dheefta Ontaariyo Trillium (OTB)

- Cashuur dhaafka Ontaariyo Trillium waxaa ku jirta cashuur dhaafka cashuurta libka ee Ontaariyo, taasoo oo ka daysa dadka dakhligoodu hooseeyo ee Ontaariyo cashuurta iibka ee ay bixiyaan. cashuur dhaafka ugu badan ee sanadlaha ah waa \$313 qof kasta oo qaangaar ah iyo cunug kasta oo qoyska ka tirsan.
- Cashuur dhaafka Tamarta iyo Hantida Ma Guurtada ee Ontario sidoo kale waxay qeyb ka tahay Dheefta Ontaariyo Trillium. Hase yeeshe, dhismayaasha ugu badan ee TCHC waa qaar laga dhaafay cashuuraha hantida ma guurtada iyo waxbarashada, oo kireystayaasha dhismayaashan uma qalmaan inay helaan cashuur dhaafka hantida ma guurtada ah.
- Liistada dhismayaasha TCHC ee ay ka bixiso cashuuraha hantida ma guurtada iyo waxbarashada ayaa qaab onlayn ah ama khadka loogu soo bandhigi doonaa bartan torontohousing.ca/taxexempt. Sidoo kale waxaad ka soo wici karta Xarunta Daryeelka Macmiilka halkan [416-981-5500](tel:416-981-5500) si aad u xaqiijiso in TCHC ay dhismahaaga ka bixiso cashuuraha hantida ma guurtada.

Kaalmada Carruurta ee Kanada (CCB)

- kaalmada ugu badan ee sannadlaha ah waa \$6,765 ilmo kasta oo da'diisu ka yar tahay 6 sano iyo \$5,708 ilmo kasta oo da'diisu tahay 6 illaa 17.
- CCB sidoo kale waxaa ku jira dheefaha carruurta naafada ah. Faa'iidada ugu badan waa \$ 240 bishiiba ilmo kasta oo xaq u leh.

Macaashka Shaqaalaha Kanada (CWB)

- Dakhli-celintaan cashuurta ee la celin karo waxay siisaa cashuur-dhimis shaqsiyaadka iyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee shaqeeya. Bixinta ugu badan waa \$1,381 oo loogu talagalay dadka kelida ah iyo \$2,379 qoysaska.
- CWB sidoo kale waxaa ku jira kaabista naafada. Bixinta ugu badan waa \$713 oo loogu talagalay dadka kelida ah ee u qalma ama qoysaska.

Cashuur dhaafka GST / HST

- Lacagtaan bilaha ah ee bilaa cashuurta ah waxay ka caawisaa shakhsiyaadka iyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa yar yar ee bixiya cashuurta GST ama HST.
- Lacagta ugu badan ee sannadlaha ah waa \$451 haddii aad keligaa tahay, \$ 592 haddii aad xaas tahay ama aad ku wada nooshihiin si sharci ah, iyo \$ 155 oo loogu talagalay ilmo kasta oo da'diisu ka yar tahay 19 sano.

dakhliga Kaabista ee Dammaanadda leh (GIS)

- Lacagta bilaha ah ee aan cashuurta laga qaadi karin ee loogu talagalay dadka qaata kaalmada hawlgabka ama waayeelka dakhligoodu hooseeyo ee ku nool Kanada.
- Qaddarka ugu badan ee bixinta bil kasta waa \$ 919.

Cashuur dhaafka Dadweynaha waayeelka ee gaadiidka dadweynaha Ontario

- Tani cashuurta la soo celin karo waxay ka caawineysaa waayeelka ka weyn 65 kharashka gaadiidka dadweynaha.
- Waxaad qaadan kartaa illaa \$ 3,000 kharashyada gaadiidka dadweynaha ee u-qalma oo waxaad heli kartaa \$ 450 sannad kasta.